# Nadiifinta Meesha Qodobka/Fiilada

Pin/Wire Site Care | Somali

*Waxbarasho bukaan*
DIS048–SO

Qodobada iyo fiilooyinku waa qaybo muhiim u ah dheeraynta addinka, cillad sixidda iyo external fixation ( xiritaanka biro lafaha isu qabta oo banaanka u soo baxsan). Ujeedada nadiifinta meesha qodobka/fiilada waa in laga dhigo meesha qodobka (ama fiilada) iyo jirku iska galaan meel jeermi aan lahayn iyo in jirka laga ilaaliyo in wax ku dhacaan. Jirka oo la nadiifiyaa waxay kaalmaysaa ka hortagtaa hurgunka/infakshon. Nadiifinta meesha qodobka/fiilada waxaa la sameeyaa todobaad walba waxaana loo kordhiyaa illaa maalin walba haddii ay jiraan calaamado barar ama hurgun/infakshon. Nadiifinta meesha qodobka/fiilada waa in la sameeyaa mar kasta oo la qubaysto, biyo lagu dhaco ama la dabaasho ka dib. (Ha qubaysan, biyo ha ku dhicin ama ha dabaalan illaa lagaa saaro dunta qodobada toliinka (waxa labada meelood ee la isku kabaayo isu keenaya iyo illaa lagu arko booqashada ka dambaysa qaliinka).

Nadiifinta meesha qodobka/fiilada waxaa lagu samaynayaa isbitaalka maalinta koowaad ee qaliinka ka dib ama maalinta labaad ee qaliinka ka dib. Wakhtigaan ayaad ka muraajaceyn/mar kale dib ugu arkeysaa nadiifinta meesha waxaana lagu siinayaa alaab aad guriga u qaadato, oo ay ka mid yihiin:

## Alaabta

Waxaanu kuu diri doonaa guri alaab leh oo aad u baahan doonto haddii tuubada caloosha si kadis ah ay uga soo baxdo caloosha. Xidhmada agabkaaga tuubada Caloosha Xaalada deg dega ayaa ka koobnaan doonta waxyaalaha soo socda:

- Shayga wax lagu mariyo oo fiinta/caarada cudbi/suuf ku leh oo jeermi lahayn/ka caagan (Sterile)
- Biyo cusbo leh oo caadi ah oo Jeermi lahayn/ka caagan
- Haydarogen (Hydrogen) Peroxide (isticmaal bar awoodiisa adigoo isku daraaya bar haydarogen peroxide iyo bar biyo cusbo leh oo caadi ah markii ay jiraan infakshanno meesha qodobka/fiilada)
- Weelal aan jeeermi lahayn oo wax lagu qaado
- Shaafado kala baran oo afar gees ah jeermina lahayn/ka caagan cabirkooduna yahay 2" X 2" (SOF-SICK* I.V. SPONGES 2" X 2" –y ply)
- Spuunyo xumbo u ego o afargees ah oo bambiiro ku xiran tahay (oo loogu talagalay Ilizarov fixator-pin/wire sites)
- Custom-cut felt strips (maado jilicsan isbuunyana ah oo jirka laga xijinayo birta qabaneysa oo adiga lagugu cabiray) (oo laagu talagalay meesha Orthofix fixator pin ku xiran tahay)

1. Si fiican ugu fara xalo Dial (ama saabuun kasta oo kale oo disha baktiiriyada) ugu yaraan hal daqiiqo adigoo isticmaalaya burushka cidiyaha ka hor nadiifinta meesha qodobka/fiilada.
2. Kor u riix biinka caagga ah oo isu haya qodobka/fiilada oo guduudan/cad (biinka guduudan oo qodobka kor saran iyo biinanka cad oo fiilooyinka kor saaran markay tahay Ilizarov fixators; Orhofix fixators malaha biinan wax isu qabta).
3. Bixi sbuunyada xumbada u eg (orthofix waa felt pads) iyo faashado. Meelaha adag waad radin kartaa, kuwa toxobtu fuushay biyo cusbo leh ama biyo cad ku shub illaa ay ka debcayaan. Si tartiib ah isbuunyada oo aad uga fujiso waxay dhintaa xanuunka iyo dhiigga.

*Usii gudub bogga kale.*

Gillette Children's
Specialty Healthcare

200 University Ave. E
St. Paul, MN 55101
651-291-2848
800-719-4040 (telefoon bilaa lacaga)
www.gillettechildrens.org

### Nagala soo xidhiidh

**Su'aalaha Deg dega ha ama Tabashooyinka Telefoon kalkaaliye Caafimaad**
651-229-3890

**Su'aalihii kale ee Ku Saabsan Daryeelkaaga**
Bukaanada Rugta Caafimaadka St. Paul:
Khad Wicitaanka Kalkaalisada
651-578-5000

Buukaanada jooga Goobaha Kale:
La xidhiidh xubin ka tirsan kooxda daryeelka caafimaadkaaga Gillette.

**Balamaha**
651-290-8707

### Buuggaag, Cajalado Maqal iyo Muuqaal ah iyo Waxyaalo badan

Raadi qalabka ku saabsan naafada, xaaladaha daawooy-inka iyo taageerada daryeel-bixiyayaasha.

**Qaniimaad Caafimaad iyo Waxbarasho**
St. Paul campus, wuxuu u dhaw yahay dabaqa afaraad skyway
**651-229-3938**
hre@gillettechildrens.com

4. Ka fiiri meelaha oo dhan guduud, jileec iyo dhacaan. Haddii meelaha oo dhammi ay yihiin kuwa aan waxba aysan saarnayn, biyo cusbo leh oo caadi ah ayaa lagu tirtiri karaa. Haddi calaamado infakshan tilmaaya ay jiraan, waa in aad isticmaashaa haydrogen peroxide awoodiisu bar/haaf tahay.
5. Dhawr shay oo ah kuwa wax lagu mariyo oo cudbi/suuf caarada ku leh ku rid biyo cusbo leh oo caadi ah kuna radi/radqi dhawr ilbiriqsi.
6. Qaad hal shay oo wax lagu mariyo una adeegso in aad si tartiib ah oo wareeg ah u mari caarada cudbiga meesha jirka iyo qodobka/fiilada ay ku kulmaan. Ha adeegsan xoog badan, laakiin ka qaad qolofta.
7. Marka meesha la nafiifiyo, waxaad tirtiri kartaa meesha qodobka ama fiilada haddii loo baahdo. Ha u isticmaalin isla shaygii aad wax ku marisay maqaarka in aad ku nadiifiso qodobka iyo/ama fiilada.
8. Meel kasta u isticmaal shayga wax lagu mariyo oo cusub.
9. Meesha saar faashad kala go'an oo ah 2" x 2", uga dambaysii isbuunyada xumbada u eg iyo biin caag ah ( waa Ilizarov fixators), iyo felt pad aad faashaddaa ka kor mariso (waa Orthofix fixators). isbuunyada waa laga yaabaa in aad dib u isticmaali karto markaad biyo iyo saabuun ku nadiifiso, ka dibna aad hal daqiiqo biyo karaaya ku riddo aadna qalajiso (air dry).
10. isku qabo/riix biinka, isbunnyada iyo faashadda si tartiib ah (cadaadis badan wuxuu keeni karaa in uu maqaarka qabto, gaar ahaan haddii barar jiro.



Macluumaadkan waxaa loogu talogalay ujeedooyin waxbarasho kaliya. Looguma talogalin is loogu badalo talada daryeel caafimaad bixiyahaaga .Haddii aad hayso wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama kooxaha kale ee daryeelka caafimaadkaaga.